

Faa'iidada farmashiyaha oo cusub oo loogu talagalay agabka sonkorowga oo laga helayo CareOregon Medicaid (OHP)

Ilaa hadda, waxaad agabkaaga sonkorowga ku heli karaysay oo kaliya boosta adiga oo haysta faa'iidadaada DME. Laga bilaabo Juun 1, 2022, waxaa dhici karta in aad agabkaaga sonkorowga ka hesho farmashiyaha, adiga oo adeegsanaya faa'iidada CareOregon ee cusub. Kuwani waxaa ka mid ah waxyaabaha wax lagu tirtiro ee aalkolada leh, irbadaha insulinta 'insulin syringes' ama irbadaha caadiga ah 'needles' iyo irbadaha qalinka 'pen needles'.

Si aad u hesho agabka baaritaanka oo yaala farmashiyaha waa in aad isticmaashaa waxyaabaha caymiskooda la bixiyo ee ku jira liiska hoose. Waxyaabahani uma baahna oggolaansho hore, ilaa iyo inta aad ka codsanayso oo kaliya qaddarka liiska ku qoran. Wawaanu bixinaa caymiska alaabta One-Touch iyo FreeStyle Libre 2 ee la socodka joogtada ah ee glucose-ka (CGM). Adeeg bixiyahaagu wuxuu u baahan doonaa in uu helo oggolaansho hore haddii aad rabto in aad mid ka mid ah kuwani ka hesho farmashiyaha. Shaxda hoose ayaa leh faahfaahin dheeraad ah.

Qoraal muhiim ah: Waxaa dhici karta in aad sii wadato isticmaalka isla shirkada DME oo isku mid haddii aad rabto. Ma aha in aad isticmaasho farmashiye agabkaaga sonkorowga.

Su'aal: **Waxaan isla hadaba isticmaalayaa nooc kale oo loogu talagalay qalabka baaritaanka 'test strips' iyo/ama CGM. Miyaal la ii oggol yahay in aan sii wato isticmaalkeeda halkii aan ka isticmaali lahaa OneTouch (ama FreeStyle Libre 2 CGM)?**

Jawaab: Haa, laakiin kaliya haddii aad sii wadato in aad agabkaaga u sii hesho si la mid ah sida aad hadda tahay. Haddii aad rabto in aad iyaga taasi beddelkeeda ka hesho farmashiyaha, waa in aad u beddelataa waxyaabaha caymiskooda la bixiyo ee ku jira liiska hoose.

Su'aal: **Miyay tahay in aan agabka ka helo farmashiyaha?**

Jawaab: Maya, caymiska DME wuu ka duwan yahay faa'iidada farmashiyaha. Waa in aad tani kala hadashaa adeeg bixiyahaaga ka hor inta aadan go'aansan. Haddii aad rabto in aad beddelato, waa in aad isla hadaba isticmaalaysaa waxyaboo caymiskooda la bixiyo oo ku jira liiska AMA aad diyaar u tahay in aad beddelato.

Su'aal: **Haddii aan diyaar u ahay in aan beddesho, miyaan heli karaa wax cabbire 'meter' cusub?**

Jawaab: Haa, waxaa laguu oggolaan doonaa in aad hesho wax cabbiraha 'meter' OneTouch oo cusub.

Su'aal: **Waxaan mar hore boosta ku helay agabkaygii sonkorowga. Sidee bay in aan iyaga ka helo farmashiyuhu ii caawinaysaa?**

Jawaab: Haddii ay kaa dhammaadaan, waxaad isla markiiba heli kartaa waxyaboo caymiskooda la bixiyo halkii aad ka sugi lahayd boosta. Wawaanu tani xataa la sameyn kartaa shirkada DME, Haddii adeeg bixiyahaagu daawada la isku qoro u diray dukaanka.

Su'aal: **Haddii aan horeba u haystay oggolaansho faylka ku jira oo loogu talagalay la socodka joogtada ah ee glucose-ka ama iska reebida la xiriirta xaddidaada tayada, miyay taasi u gudbaysaa faa'iidada farmashiyaha?**

Jawaab: Maya, adeeg bixiyahaagu waa in uu gudbiyaa codsiyada oggolaanshaha hore oo cusub haddii aad u beddelato in aad tani ka hesho farmashiyaha.

Su'aal: **Sidee baan u sameeyaa in aan ka beddesho bixiyahayga qalabka sonkorowga ee hadda una wareego farmashiye?**

Jawaab: Ka codso adeeg bixiyahaaga in uu daawooyinkaaga la isku qoro ee agabka sonkorowga u diro farmashiyahaaga aad doorbidayso.

Su'aal: **Haddii aan isticmaalayo FreeStyle Libre 2 CGM, miyaan heli karaa qalabka baaritaanka 'test strips' ee FreeStyle si aan ula isticmaalo iyada?**

Jawaab: Maya. waa in aad wax cabbiraha 'meters'/qalabka baaritaanka 'strips' ee OneTouch oo caymiskiisa la bixiyo u isticmaashaa beddel ahaan haddii uu caafimaad ahaan lagama maarmaan yahay. Ogow: Medicaid si joogto ah uma daboosho dadka labada waxyaboodba/alaaboodba.

Su'aal: **Miyay faa'iidada farmashiyaha ee cusub ku jiraan qalabka insulinta 'insulin pumps' iyo tuubooyin?**

Jawaab: Maya. Qalabka insulinta 'insulin pumps' iyo tuubooyinkooda waa faa'iidada DME oo kaliya. Ma bixino caymiska nooc kasta oo ah qalabka insulinta 'insulin pump' oo ka tirsan faa'iidada farmashiyaha.

Faa'iidada farmashiyaha ee CareOregon ee loogu talagalay agabka iyo qalabka sonkorowga

Nooca alaabta	Ku kooban (dhamaantood waxay xaq u leeyihii agab 90-maalmood ah)	Miyaa la iskaga baahan yahay oggolaansho hore?	Alaabta la daboolo caymiskooda
Qalabka wax lagula socdo	1 labadii 2-dii sanaba	Maya	<ul style="list-style-type: none"> • OneTouch Ultra 2 • OneTouch Verio Reflect • OneTouch Verio Flex • Xirmada Bilowga ee OneTouch
Qalabka Baaritaanka 'Test Strips'	150 bishiiba	Maya	<ul style="list-style-type: none"> • OneTouch Verio • OneTouch Ultra
Calibration Liquid	1 sanduuq 3-dii billoodba	Maya	<ul style="list-style-type: none"> • OneTouch Verio Solution • OneTouch Ultra
Lancet Devices	1 saddexdii 3-dii billoodba	Maya	<ul style="list-style-type: none"> • OneTouch Lancing Device • OneTouch Delica Lancing Device
Lancets	200 bishiiba	Maya	<ul style="list-style-type: none"> • OneTouch Delica Plus 33G • OneTouch Delica Plus 30G • OneTouch MIS Lancets • OneTouch MIS 30G
Alcohol Prep Pads	1 Sanduuq bil kasta	Maya	<ul style="list-style-type: none"> • Nooc kasta
Irbadaha Insulinta 'Insulin Syringes'	500 saddexdii 3-dii billoodba	Maya	<ul style="list-style-type: none"> • Nooc kasta
Irbadaha Qalinka 'Pen Needles'	200 bishiiba	Maya, oo leh sheegashada qalinka insulinta 'insulin pen' oo lacagtiisa la bixiyay	<ul style="list-style-type: none"> • Nooc kasta
Qaataha/Akhriyaha CGM	1 labaddii 2-dii sanaba	Haa	<ul style="list-style-type: none"> • FreeStyle Libre 2/Akhriyaha/Flash GM System
CGM Sensor	1 afar iyo tobankii 14-kii maalmoodba	Haa	<ul style="list-style-type: none"> • FreeStyle Libre 2/Sensor/Flash GM SYSTEM